Ilmahaaga Dambi ma lagu soo oogay?

Qoraalka bogogaan, ilmo waxaa loola jeedaa qof da'diisu ka yar tahay 18 sano.

Ilmaha lagu soo oogay dambi waxuu la-talin uga baahan yahay garyaqaan khibrad u leh sharicga dambiyada. Waa ka sii fiican tahay haddii garyaqaanku khibrad u leeyahay sharciga dambiyada ay galaan dhallinyaradu. Haddii aadan ilmahaaga ka bixin karin kharajka garyaqaanka, waxaa suurtoowda in ay arrintaan wax kaala qabato hey'adda Ontario ee dadka ka caawinta xagga sharciga (Legal Aid Ontario).

Ilmahaagu garyaqaan buu u baahan yahay xataa haddii usan dambi galin ama u ku yiraahado kiisku wax micno ah ma laha. Maxaa yeelay waxaa hadhoow ka imaan kara qiimo ayeey yeelan karaan.

Waxaa waajib booliiska ku ah in uu kula socodsiiyo haddii ilmahaaga la xiro, dambi lagu soo oogo, ama ay tahay in maxkamad la hor geeyo. Waxaa fiican in aad la socotid oo aad isku taxlujisid kiiska ilmahaaga. Haddii ay suurogal tahay, waxaa fiican in aad ilmahaaga u raacdid saldhigga booliiska iyo maxkamadda.

Ilmaheygu maku khasban yihiin in ay maxkamadda tagaan?

Haddii ilmahaagu damabi lagu soo oogay, sida qaalibka ah waa inay maxkamadda dambiyada tagaan ugu yaraan mar. Wixii markaas ka dambeeya, waxaa jira siyaabo arrinta wax looga qaban karo iyadoon maxkamadda la tagin.

Haddii ay maxkamaddu go'aamiso in ilamahaaga la ciqaabo, ciqaabtu waxey noqon kartaa mid aan xabsi ahayn. Ilmahaagu waa in ay kala hadlaan garyaqaankooda haddii ay jiraan wax kale oo suurtogal ahaan la sameynkaro.

Dambiyada lagu soo oogo ilmaha sharcigu waa uga yare dabacsan yahay kuwa lagu soo oogo dadka waaweyn. Hase yeeshe dambiyada aad khatarta u ah badankood, waxaa dhici karta in ilamaha loo ciqaabo sida dadka waaweyn oo kale.

Maxaan ka filan kara garyaqaanka ilmaheeyga?

Garyaqaanku ilmahaaga ayuu u shaqeeya, xitaa haddii aad adigu kharajkiisa dhiibeeysid. Sidaas darteed ilmahaaga ayuu garyaqaanku la hadlayaa, wixii go'aamo ah oo la qaadanayana iyaga ayuu kala tashanayaa.

Waad ka codsan kartaa garyaqaanka in uu kula socodsiiyo hadba sida kiisku u socdo. Su'aalo waad ka weeydin kartaa. Laakiin garyaqaanku kaagama xogwarrami karo kiiska haddii ayan ilmahu u fasaxin.

Ilmaheeygu ma sii wadan karaan dhigashada dugsiga?

Sida qaalibka ah, ilmaha ku lug yeesha arrimo la xiriira dembi-gelid weli xaq beey u leeyihiin in ay sii wataan dhigashada dugsiga. Mararka qaarkood maxkamaddu waxey fartaa in ilmahu uusan aadi karin dugsi cayinan inta u kiisku ka dhammaanayo. Haddii arrintaani ay dhacdo ilmahaaga waxaad geyn kartaa dugsi kale.

Xaaladaha qaarkood, dugsigu waxuu yeeli karaa in uu ilamaha ka joojiyo ama ka eryo dugsiga, xitaa arrin aan dugsiga dhexdiisa ka dhicin awgeed. Waxaa jira tilaabooyin aad qaadi kartid si ilmahaaga uu dugsiga u sii dhigto. Hey'adaha beesha iyo kilinikiyaasha qaarkood ayaa ka caawin kara arrintaan.

Dembi ku soo oogistu mustaqbilka ilmaheyga wax ma u dhimmi doontaa?

Markii ilmahaaga lagu soo oogo dambi, booliiska iyo maxkamaddu wey tixraaci karaan arrintaas iyagoo ku haynaya gal magaciisa la yiraahado "rikoor" (records).

Rikoorkaan booliiska iyo maxkamaddu ilmahaaga muddo dheer ayuu mushkilad u keeni kara. Marka da'da ilmahaagu ay gaarto 18, waxaa loo qaddarinaya in uu yahay qof weyn. Hase yeeshee rikoorkii hore ee ilmahaaga dadku weli dib bey u eegi karaan.

↪ bogga 2aad warar kale ayaa ku qoran ↪

Ilmahaaga rikoorkoodu waxuu u keeni kara, tusaale ahaan, in ay ku adkaato helitaanka shaqada ama u safarka dalal kale. Rikoorku waxuu saameeyn kara xaaladda socdaal ee ilmahaaga. Kiisaaska qaarkood, rikoorka ilmahaagu waxuu xitaa saameeyn ku yeelan kara xaaladda socdaal ee qooyska.

Maxaan sameeyaa haddii la i weeydisto in aan ka magdhabo/gudo waxii ilmaheygu geysteen?

Haddii markii ilmahaagu ay wax yeleeyeen, burburiyeen, ama ay xadeen wax qof kale leeyahay ay da'dooduna ka yareeyd 18 sano, mulkiluhu wuu isku dayi karaa inuu magdhow ku weydiisto. Ma aha in aad magdhow dhiibto in ay maxkamad kugu amarto mooyee. Haddii aad heshid warqado ku faraya in aad maqdhow bixisid, tus warqadaha garyaqaan ama kilinikada sharciga.

Haddii mulkiluhu dacwad maxkamadeed kugu soo oogo, waxaad hortegi doonta maxkamadda rayidka, ee ma aha maxkamadda dambiyada. Waxaa jira wakhti xaddidan oo aad dacwada isaga daafici kartid, haddii kale maxkamaddu waxeey kugu amri karta in aad kharajka bixisid. Isla markaas raadso caawinaad xagga sharicga ah. ❢

Boggaan waxaan kuugu sheegeynaa warar guud oo keliya. Waa in aad heshaa la-talin sharciyeed oo xaaladaada ku saabsan.

Sida kaalmo loo helo

Findhelp waa hey'ad beeleed oo dadka ku caawisa luqado badan. Waxey teleefoonka ka jawaabaan afar iyo labaatanka saac (24-ka saac), toddobada beri ee asbuuc walba.

Waxey kuu sheegi karaan:

- meesha aad cawinaad sharci ka heli kartid, iyo
- sida aad ula xiriiri kartid hey'ad dejineed ama hey'ad beeleed oo aad ka heli kartid caawinaad noocyo kale ah.

Findhelp kala xiriir:

☎ Lacag la'aan ah
(Toll-free) **1-866-667-5366**

☎ Lacag la'aan ah ee dadka maqalka ka dhibaateeysan
(Toll-free TTY) **1-888-340-1001**

💻 **www.211ontario.ca**

Caawinaado kale:

Waxaa soo diyaariyey CLEO (Community Legal Education Ontario/Éducation juridique communautaire Ontario) iyagoo ay kala shaqeyeen CLEO Six Languages Advisory Group, oo ka kooban 10 hey'adood oo xubin ka ah.
Mashruucaan waxaa maalgaliyey Ontario Trillium Foundation iyo Legal Aid Ontario.
CLEO waxey Findhelp uga mahad celinaaysa caawinaada teleefoonka oo ay mushruucaan ka geeysteen.
Booqo **www.cleo.on.ca** si aad bogogaan iyo warar kale ugula soo baxdid.